

# Tallaalada Wuxuu Naga Ilaalinaya COVID-19

## Qofkee qaadan kara tallaalka?

- Dadka aan guryaha laheen iyo bixiyeyaasha adeegga ayaa heli kara tallaalka hadda.
- Tallaalka waa u bilaash qofwalba.
- Aqoonsi ama caymis looma baahna.
- Socdaalka ama sharciga muwaadinimadu macno malahan.



## Maxaa tallaalka loo qaataa?

Si aad uga ilaaliso bulshadaada, kuwa aad jeceshahay, odayaasha, iyo naftaada inaad ku xanuunsato COVID-19.



Adiga ayaa dooranaya inaad qaadato talaal iyo inkale.

## Sidee ayuu ushaqeeya?

Tallaalku wuxuu barayaa jirkaaga inuu iska difaaco COVID-19.



Tallaalku kuma jiro fayraska COVID-19 kumana siin karo COVID-19

Sidoo kale kuma jiraan hilib doofaar ama ukun.

Tallaalada qaar wuxuu qaataa labo daawo, kuwa kalena hal daawo.



## Tallaalka ma amaan baa?

- ✓ Haa. Tallaal kasta wuxuu badbaado u leeyahay oo waxtar u leeyahay dadka da'ahaan kala duwan, jinsiyadaha, noocyada jirka, iyo xaaladaha caafimaad.
- ✓ Tallaal kasta oo ah 'COVID-19' wuxuu ku qasbanaaday inuu dhafo (ka gudbo) tallaabooyin badan oo xagga amniga ah oo ay qaadaan dhakhaatiirta iyo khabarada caafimaadku.

# Tallaalada Wuxuu Naga Ilaalinaya COVID-19

## Maxaa dhacaya markaan qaato tallaalka?

Shaqaalaha caafimaadka ayaa ku weydiin doona xoogaa su'aalo ah, ka dibna wuxuu ku siin doonaa tallaalka gacantaada kore.



Shaqaaale caafimaad oo kale ayaa kula sugi doona 15 ilaa 30 daqiiqo, oo kaaga jawaabi doona wixii su'aalo ah.

## Maxaa dhacaya kadib markaan qaato tallaalka?



Dadka qaarkiis waxaa laga yaabaa inay yeeshaan cudud xanuun, madax xanuun, ama ay dareemaan daal. Tani waa wax iska caadi ah waxayna tagi doontaa maalin ama laba kadib.

Xusuusnow inaad biyo badan cabto, oo joogto goob diiran, oo nasato.

Waxaa si buuxda lagu talaalay laba toddobaad kadib talaalkaagii ugu danbeeyey.

## Maxaan sameeyaa ka dib markaan is tallaalo?



Xiro afixirka (maaskaro)



Ka fogow 6 tallaabo (cag) dadka kale



Marwalba dhaq gacmahaaga

## Su'aalo ma qabtaa?

- Wac khadadka caafimaadka ee EvergreenHealth 425.899.3000, kadib taabo (dooro) 2.
- Booqo [kingcounty.gov/vaccine](https://kingcounty.gov/vaccine) wixii macluumaad dheeraad ah.
- Si aad u ballansatid ballanta tallaalka, wac 206-477-3977 (8 subaxnimo-7 galabnimo, adeegyo luqadeed oo la heli karo).

